Australian Human Rights Commission
*everyone, everywhere, everyday*

# Cabasho sameynta

Golaha Xuquuqda Bani'aadamka Australiya waa hay'ad madax bannaan oo baara xaliya cabashooyinka ku saabsan galmada sharci darada ah, sinjiga, naafada iyo takoorka da'da, ILO III jebinta iyo takoorida xuquuqda bani'aadamka.

## Waxaad nooga soo caban karto ee ku saabsan

- ***Takoorka galmada*** waxaa ka mid ku dhibid galmo iyo takoorida ku saabsan galmada, aqoonsiga jinsiyadeed,xaalada galmo, uurka, xaalada xiriirka ama guur, naas nuujinta, masuuliyada qoyska iyo nooca u galmoodka.
- ***Takoorka Naafada*** waxaa ka mid ah takoorka ku saleysan mid jireed, garaad, dareemayaal, waxbarashada iyo iimaha dhimirka, cudurada ama jirooyinka; xaaladaha caafimaad; dhaawacyada shaqada la xiriira, ta la soo dhaafay, hada la joogo iyo iimaha mustaqbalka; caawiyayaasha naafada; xayawaanka ku caawinaya iyo xiriirkaaga qof iin leh.
- ***Takoorka Jinsiyada*** waxaa ka mid ah naceybka jinsiyadeed iyo takoorka ku saleysan jinsiyada, midabka, meeshaad ka soo jeedid, dhalashada ama isirkaaga asalka ah iyo xaaladaada soogalootinimo.
- ***Takoorkka da'da*** includes waxaa ka mid ah takoorka ku saleysan aad u yaraanta ama aad u weynida.
- ***Takoorka ILO III*** waxaa ka mid ah takoorka shaqada oo ku saleysan diinta, diiwaanka dembiga, waxqabadka ururka shaqaalaha, fikrada sayaasadeed iyo bulshadaada asalka ah.
- ***Xuquuqda bani'aadamka*** waxaa ka mid ah falalka ay sameyso Dawlada dhexe ee barwaaqo sooranka ama iyadoo la metelayo ee lagu soo dacweeyey inay jebiyeen nooc ka mid ah xuquuqda bani'aadamka caalamka oo khaas ah, sida Heshiiska Caalamiga ah ah ee Xuquuqda Siyaasadeed iyo Madaniga ah, Xuquuqda Ilmaha ee laysku Raacay iyo Xuquuqda laysku raacay ee Dadka leh Iimaha.

Waxaad sameyn kartaa cabasho iyadoon loo eegaynin meeshaad kaga nooshahay Australia wax kharash ahna kuguma kici doonto inaad cabasho sameysid. Tallaabooyinka nidaamka cabashooyinka hoos ayaa lagu sharxay.

## Wax weydiin samee

- Haddii aadan hubin haddii aad sameysid cabasho ku saabsan wax, waxaad kula xiriiri kartaa Adeegga Macluumaadka Qaranka ee Golaha taleefan ah **1300 656 419** ama iimeyl infoservice@humanrights.gov.au

April 2020

- Waxaan kuu soo diri karnaa foomka cabashada si aad u bilowdid nidaamka.
- Haddii aanan ku caawin karin, waxaan iskudeyi doonaa inaan kuu gudbino qof ku caawin kara.

## Cabasho samee

- Cabashadu waa inay noqotaa qoraal. Waxaad buuxin kartaa foomka cabashada oo aad boosta ku soo diri kartaa ama fakis noogu soo celin kartaa ama waxaad ka soo xareyn kartaa cabashada online ka website keena ah www.humanrights.gov.au.
- Waxaad sameyn kartaa cabasho luuqadaad doorbideysid waxaana kaa caawin karnaa inaad qortid cabashadaada haddii ay lagama maarmaan noqoto.
- Uma baahnid sharci yaqaan si aad cabasho u sameysid.
- Haddii aanan geli karin cabashadaada, waxaan kuu sharxi doonaa sababta.

## Baaritaan

- Waan kula soo xiriiri doonaa si aan kaala hadalno cabashadaada waxaana laga yaabaa inaan ku weydiino bixin macluumaad dheeraad ah.
- Guud ahaan, Goluhu wuxuu la soo xiriiri doonaa qofka ama ururka aad ka cabaneysid waxaana siin doonaa nuqul ah cabashadaada. Waxaa laga yaabaa inaan weydiino inay bixiyaan macluumaad khaas ah iyo/ama jawaabta cabashadaada. Macluumaadka la siiyey Golaha ee looga jawaabayo cabashadaadii waxaa laga yaabaa inay ka kooban tahay macluumaad shakhsiyeed, oo ay ka mid yihiin macluumaad xasaasi ah oo adiga kugu saabsan.
- Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaan go'aansano in aanan sii wadin cabashadaada. Haddii tani ay dhacdo, waxaan kuu sharxi doonaa sababta.
- Waxaa laga yaabaa inaan kaala hadalno wax ku saabsan iskudeyga in cabashada lagu xaliyo dhexdhexaadin.

## Dhexdhexaadin

- Dhexdhexaadinta micnaheedu waxaa weeye inaan iskudeyno inaan caawino adiga iyo qofka ama ururka aad ka cabaneysid inay helaan si lagu xaliyo arinta.
- Dhexdhexaadintu waxay ku dhici kartaa kulan lays hor fadhiisanayo oo la layiraahdo 'shirka dhexdhexaadinta' ama shirka taleefanka lagu qabto. Xaaladaha qaarkood, cabashooyinka waxaa lagu xalin karaa isdhaafsiga iimeylo iyo la hadalka dhexdhexaadiyaha.
- Cabashooyinka waxaa lagu xalin karaa siyaalo fara badan oo kala duwan. Tusaale, cudurdaar, bedelaadha qorshaha ama magdhow.

## Fal maxkamadeed suurtagal ah –ku takoorka galmo, iin iyo da'a

- Goluhu ma laha awooda uu ku go'aaminayo haddii uu dhaco takoorid aan sharci ahayn.
- Haddii cabashadaada aan la xalin ama loo joojiyo sababo kale awgood, waxaa laga yaabaa inaad awoodi doonto inaad arinta maxkamad geyso. Maxkamada ayaa go'aamineysa in kala soocid aan sharci ahayni dhacday iyo in kale.
- Waxaad heysataa 60 maalmood marka goluhu uu joojiyo cabashada inaad codsi u qoratid Maxkamada Dawlada Dhexe ee Australia ama Maxkamada Wareegta ee Dawlada Dhexe ee Australia.
- Goluhu arinta maxkamad kuuma geyn karo ama kaama caawin karo inaad kiiskaaga maxkamada ka sheegto.
- Waxaa laga yaabaa inaad u baahatid la hadalkka sharci yaqaan ama adeega sharciga haddii aad dooneysid inaad maxkamad tagtid.

## Warbixin/Go'aan – xuquuqda bani'aadamka iyo takoorida

- Haddii cabashada aan la xalin ama loo joojin sababo kale, Guddoomiyaha Golaha ayaa laga yaabaa inuu go'aamiyo haddii takoorida ILO III ama jebinta xuquuqda bani'aadamku ay dhacday.
- Haddii Guddoomiyuhu uu ku qanco in takoorida ama jebinta xuquuqda bani'aadamku ay dhacday, waxaa laga yaabaa inuu Guddoomiyuhu arinta uga warbixiyo Xeer ilaaliyaha Guud ee Dawlada Dhexe. Warbixinta, Guddoomiyuhu wuxuu ku talin karaa magdhowga wixii lumay ama dhaawac ee uu qofkani soo maray. Warbixinta waxaa laga yaabaa in Baarlamaanka la horgeeyo.
- Tusaalayaasha Godoomiyaha go'aamadiisa ku saabsan takoorida iyo xuquuqda bani'aadamka waxaa laga helayaa websie ka Golaha ee ah http://www.humanrights.gov.au/publications/reports-minister-under-ahrc-act.

## Xaggee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Golaha Xuquuqda Bani'aadamka Australia xiriirka faahfaahintiisu waa:

**Taleefan**
Khadka Macluumaadka Qaranka: 1300 656 419
TTY: 1800 620 241
NRS 133 677
Fax: (02) 9284 9611

Haddii aad u baahan tahay turjumaan waxaad wici kartaa **131 450** oo aad weydiisan kartaa in lagugu xiriiriyo Golaha Xuquuqda Bani'aadamka Australia.

Haddii aad dhegaha la'dahay ama maqalka dhib kaa heysto waxaad nagala soo xiriiri kartaa TTY ee 1800 620 241.haddii aad dhagoole tahay ama dhib kaa heysto magalka iyo hadalka sidoo kale nagala soo xiriir Adeegga Tebinta Qaranka (NRS) ee 133 677. Haddii aad u baahan tahay turjumaanka Auslan ka waan kuu qaban karnaa kan adiga.

Haddii aad indho la'dahay ama dhib aad ka qabto indhaha waxaan kugu siin karnaa macluumaad qaabab bedel kood markii aad soo codsato.

**Soo dir**

GPO Box 5218
Sydney NSW 2001

**Online**
Iimeyl: infoservice@humanrights.gov.au
Website: www.humanrights.gov.au

Cabasho ayaad online ku sameyn kartaa adoo gelaya http://www.humanrights.gov.au/complaints/lodging-your-complaint.

## Tallo sharci oo guud

Haddii aad ka fekeraysid wax ku saabsan cabashada, waxaa laga yaabaa inaad hesho tallo sharciyeed. Waxaa jira adeegyada sharciga bulshada oo bixin kara tallo bilaash ah oo ku saabsan dhibida iyo takoorida.

Waxaad kala xiriiri kartaa Hay'ada Caawimaada Sharciga (https://www.nationallegalaid.org/for-individuals/) ama xaruntaada kuugu dhow ee sharciga bulshada (www.naclc.org.au/directory).

**Afeef: macluumaadka warqadaan xaqiiqda ku qoran waxaa loogu talagalay oo kaliya hagitaan. Ma aha wax kuu bedelaya tallada sharciga.**